**Khibradaha:** “Janet Mills is a lifelong Mainer. She served in the Legislature on the budget committee and was Maine’s first woman to serve as Attorney General. After marrying her husband, who was a widower Janet Mills became a full-time mom to five daughters while working full-time; she learned a lot about compromise!”

**Hadafyada:** “Janet will work to make healthcare and prescription drugs more affordable, improve Maine’s economy and make sure every child has the opportunity to succeed by funding Maine education.”



### Shawn Moody

**Shaqada Hada:** Ganacsade

**Magaalada:** Gorham, Maine

**Website:** [ShawnMoody.com](http://ShawnMoody.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Nidaamka hogaamintaydu waxay ku salaysan tahay awoodsinta dadka iyo in aan ku adkeeyo sidii ay guul u gaaraan. Waxaan leeyahay in ka badan 40 sano oo waayo-aragnimo ah, waan garanayaa sida loo dhiso hay’ad guul leh. Maine guul ayay gaari doonaa hadii aan maalgalino khayraadkeena iyo dadkeena.”

Republican Party  
Candidate

**Khibradaha:** “Waxaan haystaa in ka badan afartan sano oo khibrad guud ah oo aan maamulayey shirkad horumar leh oo kutaal Maine. Sidoo kale waxaan ahaa qofkii ugu horeeyay ee u adeega labada jaamacadood iyo kuuliyada ee Maine nidaamkooda wakiilka. Waan aqaanaa sida loo dhiso wadaxaajoodka iyo in wax laga qabsado.”

**Hadafyada:** “Waxa ugu horeeya ee aan xooga saaraya Gudoomiye ahaanu inaan sii wado xoojinta iyo kobcinta dhaqaalaha Maine sidaa darteed dadka Maine waxay fursad u leeyihiin inay ku barwaaqaystaan gobolkeena quruxda badan.”

# ★ Seneterka Maraykanka

Seneterka Maraykanku waxay qoraan ayna ansaxiyaan sharciyada u degsan Maraykanka. Waxay la wadaagaan shaqadan xubnaha aqalka wakiilada, kuwaas oo lagu magacaabo xubnaha congresska rag ama dumar.

Senetaradu waxay kaloo aqbalaan xubnaha golaha, garsoorayaasha federaalka iyo ambasadoorada dibada kuwaas oo uu doorto Madaxweynuhu.

Gobol kasta waadiniintu waxay soo doortaan laba Seneter kuwaasoo matalaya gobolka oo dhan. Waxay u adeegaan gobolka lix sano. Codbixiyayaashu waxay dooran karaan Seneterka intii sano aoo ay rabaan. Xubnahani waxay ka tirsan yihiin 100, laba gobolkiiba. Labii sano ee kasta sadex meelood meel (1/3) ee seneterada ayaa la doortaa. Seneterada maraykanka waa inay yihiin ugu yaraan 30 jir. Waa inuu yahy muwaadin dalka maraykanka ugu yaraan sagaal sano kuna nool gobolka Maine.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 6 sano

**Mushahaarka:** \$174,000 sanadkii

## ★ Musharaxiinta



Xulashada doorashada codaynta



### Eric Brakey

**Shaqada Hada:** Aqalka Senatka ee Gobolka

**Magaalada:** Auburn, Maine

**Website:** [EricBrakey.com](http://EricBrakey.com)


**War bixinta Shakhsiga:** “Maine wuxuu u baahan yahay heshiis wanaagsan. Washinton waa degaanka ugu qanisan Maraykanka halka ay dadka Maine ay qaataan lacag yar ayna bixiyaa canshuur badan. Waxaan u cararayaa aqalka senatka si aan ugu dagaalamo Maine kana qaado dhibaatooyinka ay Washington ku hayso dhaqaalaheena, si’ay caruurteenu u helaan shaqooyin bixiya mushahaar badan halkan guurina.”

Republican  
Party Candidate

**Khibradaha:** “Aqalka senetka ee gobolka, waxaan dhisay urur isku jir ah si’aan u jarno canshuuraha, hagaajinta samafalka iyo balaarinta daryeelka doorashooyinka caafimaadka. Hada, shaqo bixiyayaasha Maine ayaa qaadanya dad shaqaale ah. Waxaan samaynay horumar weyn.”

#### Hadafyada:

- Yaraynta deynta qaranka iyo in la dhiso dhaqaale xor ah si loo dhimo cashuurta federaalka iyo dhiirigelinta maalgelita meelaha looga baahan yahay.
- Hagaajinta daryeelka caafimaadka iyadoo la isticmaalayo habka xulashada
- Difaacida xornimadeena hadaynu nahay dadka reer Maine



### Angus King

**Shaqada Hada:** Aqalka Senetka Maraykanka

**Magaalada:** Brunswick, Maine

**Website:** [AngusForMaine.com](http://AngusForMaine.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Waxaan markasta isku dayaa sidii aan metelo dadka Maine sida ugu wanaagsan, hawl kar nimadooda, iyo balan qaadkooda inay ka mid noqdaan iyo wanaaga wada hadalada. Aqalka senatka, waxaan ka shaqeeyey dhiirigelinta wada hadalo ka dhexeeya dadka iniga oo aan u eegayn xiriika siyaasda si’aan u wada xalino dhibaatooyin foodsaaraya dalkeena inagoo isku duuban.”

Xisbiga Madaxa  
Banana  
Musharaxa

**Khibradaha:** “Siyaada wakhtigan aan ku jirno waxay inoo sjeegaysaa in aad looga fekiro sidii loo heli lahaa hogaamiyayaal usoo jeeda danta guud una dagaalamaya kumayaal qof oo ku nool Maine daryeelka caafimaadkooda iyo inay helaan shaqooyin wanaagsan guud ahaan gobolka. Waxaan hubaa khibradayda aan kula soo shaqeeyey dadka Maine markii aan ahaa maamulaha gobolka iyo hada seneter ahaan ayaa ii ogolaatay inaan noqdo qofka keliya ee sii wadi kara shaqadan.”

#### Hadafyada:

- In kor loo qaado ka hortaga iyo daawenta sakhshiyaadka la halgamaya dhibaataada isticmaalka daroogada
- Ilaalinta iyo balaarinta helitaanka caymisyada caafimaadka
- Ka shaqaynta dibu dhiska dhaqaalaha degmooyinka yar yar ee Maine iyadoo la balaarinayo internetka, hor u marinta shaqaalaha iyo ka fogaanshaha saamaynta isbedelak cimilada.

# ★ Seneterka Maraykanka

## ★ Musharaxiinta



Xulashada doorashada codaynta



## Zak Ringelstein

**Shaqada Hada:** Macalin dugsiyada bulshada

**Magaalada:** Yarmouth, Maine

**Website:** [RingelsteinForMaine.com](http://RingelsteinForMaine.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Xaaskayga, Lea, iyo anigu waxaan kusoo kornay degaan ka baxsan magaalada ahna dad u badan shaqaale. Kadib markaan dhameeyey jaamacada iyadoo laygu leeyahay \$150,000 denta waxbarasha, waxaan xooga saarnay si’aan ugu shaqayno macalinimo dugsiyada bulshada aana abaabulnay ganacsi dhinaca waxbarrashada ah. Hadaan ahay aabe laba caruur ah oo yar yar intii lagu jiray maamulka Trump, waxaan aamin sanahay in loo baahan yahay hogaamiye aan isbedel kusamayn fikrado kale.”

Democratic  
Party Candidate

**Khibradaha:** “Markii layga soo casumay Xafiiska Cad si aan uga shaqeeyo hirgelinta si loo sameeyo waxbarasho, waxaan ogaaday markiiba in dadka qolkaa ku jiray ay midkoodna ka shaqayn arimaha waxbarashada sugsiyada bulshada. Arimaha dadka garab rarata ah mar walba waa laga hadlaa iyaga oon joogin goobaha lagaga hadlayo arimahooda. Waxaan u cararayaa aqalka senatka si’aan u bedelo maalkukaas.”

### Hadafyada:

- Hirgelinta caafimaadka dawlada kuli dadka, sababtoo ah daryeeka caafimaadku waa xuquuqda aadnaha
- Dib u kobcita dhaqaalaheena iyo inaan u dagaalano isbedelka cimilada iyo maal gelinta ururka Green New Deal.
- Kasaar lacagaha siyaasada iyada oo la horseedayo isu taga dadka oona ladar goynayo kuwa u ololeeya shirkadaha waaweyn.

# ★ Wakiilka Maraykanka – Degmada 1

Xubnaha aqalka Maraykanka waxay qoraan ansaxiyaana sharciyada dalka maraykanka. Waxay shaqadan la wadaagaan Seneterada. Sharciyada kor u qaada lacagaha lagu horumariyo arimaha dawlada waxay kasoo bilaabmaan aqalka wakiilada waana inay ansixiyaan Seneteradu. Xubnaha wakiiladu waxaa kaloo lagu maga caabaa xubnaha congresska rag ama dumar.

Dalka Maraykanku wuxuu ukala qaybsamaa 435 degmood. Degmo kasta waxay ku salaysan tahay dadka degan gobolkaas. Gobol kasta wuxuu leeyahay hal xubin oo wakil ka ah gobolkaas. Maine waxay leeyihiin laba xubnood. Kuli Xubnaha wakiilada ee Maraykanka ayaa lagu soo doortaa tiro dhaban ah sadada. Codbixiyayaashu waxay dooran karaan xubnaha golaha intii jeer ay rabaan. Wakiilada xubnaha goluhu waa inay 25 sano jir yihiin ugu yaraan. Waa inay yihiin muwaadiniin dalka maraykanka ugu yaraan todoba sano kuna nool Maine.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 2 sano

**Mushahaarka:** \$174,000 sanadkii

## ★ Musharaxiinta – Degmada 1



Xulashada doorashada codaynta



### Martin "Marty" Grohman

**Shaqada Hada:** La-taliye shirkadaha ganacsiga saqafyada

**Magaalada:** Biddeford, Maine

**Website:** [MartyGrohman.com](http://MartyGrohman.com)

**War bixinta Shakhsiga:** "Dadka Maine maaha kuwo si wanaagsan loogu adeegay xaga siyaasiyiinta khibrada badan. Cilada Washington waxay ku jirtaa meel wanaagsanayn, waxaan leeyahaya rikoodh ku salaysan ganacsiga iyo sharci-dejinta gobolka ee helitaanka xalal xoogan dhibaatooyinka ugu wayn ee gobolka waa isu keenida dadka. Si doo kale taas ayaan waxa ka qaban doonaa baarlamaanka."

Xisbiga Madaxa  
Banana  
Musharaxa

**Khibradaha:** "Waxaan bilaabay ganacsi wax ku ool leh Maine. Waayo-aragnimadani waxay muujinaysaa inaan awood u leeyahay in aan wax walba ka shaqeeyo jawi adag iyo kartida aan ku caawin karno dhaqaalaheena. Waxaa la ii magacaabay "xubin aan dhinac raac sanayn" oo ka tirsan Baarlamaanka Maine, waxaan xaqiijiyay rikordh ah in la dhiso xalal la isku raacsan yahay."

**Hadafyada:**

- Dhamaystirida khilaafka iyo in ay Washington shaqeyso
- Ka hortaga isticmaalka maan dooriyaha opioids, daryeel caafimaad, iyo shaqo abuuris
- Uga dood magaca Maine – ma'aha keliya xisbigaaga inaad wakiil ka noqotid



### Mark Holbrook

**Shaqada Hada:** Ganacsade

**Magaalada:** Brunswick, Maine

**Website:** [Holbrook4ME.org](http://Holbrook4ME.org)

Republican  
Party Candidate

*Musharaxu ma bixin macluumaad.*

# ★ Wakiilka Maraykanka – Degmada 1

## ★ Musharaxiinta – Degmada 1



Xulashada doorashada codaynta



## Chellie Pingree

**Shaqada Hada:** Haweenay Congreska Maraykanka

**Magaalada:** North Haven, Maine

**Website:** [ChelliePingree.com](http://ChelliePingree.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Waxaan aaminsanahay in qof kasta oo doonaya inuu si adag u shaqeeyo uu helo fursad uu ku guuleysto. Taas macnaheedu waa qalabaynta dhalinyaradeena waxbarasho heer caalami ah; hubinta inaan heysano dhaqaale ka shaqeeya qof walba, ma ahan kuwa kaliya ee ugu sareeya; garanaya in helitaanka daryeel caafimaad oo la awoodi karo lehna tayo sare.”

**Democratic  
Party Candidate**

**Khibradaha:** “Hadaan ahay beeraley iyo milkiilaha ganacsade yar, waxaan garan karaa in ay adag tahay in la isku dheel tiro miisaaniyad, siinta shaqaalaha faa’iido wanaagsan oo bixisa canshuuraha. Iyo, waxaan soo qaatay casharadaas intan ku jiray Aqalka Congreska, la shaqeynta cid kasta waxay keentaa wax qabasho wada jir ah ee Maine”

### Hadafyada:

- Hawlgalka daryeelka caafimaadka iyo qiimaha dawooyinka; la ilaaliyo caafimaadka dawlada iyo Lambarka Bulshada hawlgabka
- Hubi in askarta ciidamadu ay heli karaan faa’idooyinka ay kasbadeen
- Iska ilaali maamulka Trump ee isku daya in uu baabi’iyo xuquuqda iyo ilaalinta muhiimka ah

# ★ Wakiilka Maraykanka – Degmada 2

Xubnaha aqalka Maraykanka waxay qoraan ansaxiyaana sharciyada dalka maraykanka. Waxay shaqadan la wadaagaan Seneterada. Sharciyada kor u qaada lacagaha lagu horumariyo arimaha dawlada waxay kasoo bilaabmaan aqalka wakiilada waana inay ansixiyaan Seneteradu. Xubnaha wakiiladu waxaa kaloo lagu maga caabaa xubnaha congresska rag ama dumar.

Dalka Maraykanku wuxuu ukala qaybsamaa 435 degmood. Degmo kasta waxay ku salaysan tahay dadka degan gobolkaas. Gobol kasta wuxuu leeyahay hal xubin oo wakil ka ah gobolkaas. Maine waxay leeyihiin laba xubnood. Kuli Xubnaha wakiilada ee Maraykanka ayaa lagu soo doortaa tiro dhaban ah sadada. Codbixiyayaashu waxay dooran karaan xubnaha golaha intii jeer ay rabaan. Wakiilada xubnaha goluhu waa inay 25 sano jir yihiin ugu yaraan. Waa inay yihiin muwaadiniin dalka maraykanka ugu yaraan todoba sano kuna nool Maine.

**Mudada (sanadka doorashada soo socota):** 2 sano

**Mushahaarka:** \$174,000 sanadkii

## ★ Musharaxiinta – Degmada 1



Xulashada doorashada codaynta



Xisbiga Madaxa  
Banana  
Musharaxa

### Tiffany Bond

**Shaqada Hada:** Qareen (Sharciyada Qoyska) iyo Dhexdhexaadiye

**Magaalada:** Portland, Maine

**Website:** [Bond2018.com](http://Bond2018.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Sharciyada federaalku waa aasaaska sharciyada gobolkeena. Tani waa shaqo muhiim ah oo u baahan in aqalka wakiiladu ay noqdaan kuwo sharciyada aaminsan, akhrin doona sharciyada, garan doona sharciyada, kuna kalsoon saameynta sharciyadan dhamaanteen.”

**Khibradaha:** “KA shaqaynta sharciyada qoysaska waxaan raaca wadooyinka sharciyada federaalka (cashuuraha, daryeelka caafimaadka, amniga bulshada, iwm) kala shaqeyey sharciyadan dadka aan si wanaagsan u wada shaqayn karin. Waxaan dhexdhexaadiyaa natiijooyin macno guud leh. Aan u dirno qof jecel shaqadan oo ka wada xaajoon kara jawiga sunta ah ee hada jira.”

#### Hadafyada:

- Diirada saar tayada iyo waxtarka sharciyada dawlada federaalka
- Balaarinta mawjadaha isgaarsiinta nternetka
- Horey umarinta sharciyada daryeelka caafimaadka



Democratic  
Party Candidate

### Jared Golden

**Shaqada Hada:** Kaaliyaha Aqalka Wakiilada

**Magaalada:** Lewiston, Maine

**Website:** [JaredGoldenForCongress.com](http://JaredGoldenForCongress.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Waxaan ka socdaa Lewiston, waxaan ku biiray milatari ka dib weerradii 9/11. Waxaa la ii doortay sharci-dejinta gobolka sannadkii 2014, halkaan oo aan u istaagay shaqooyinka dadka reer Maine waxaan u dagaalamay helitaanka daryeelka caafimaadka iyo mushahar cadaalad ah. Aqalka Congresska waxaan mar walba ku dari doona dadka Maine, ma’aha shirkadaha ama deeq-bixiyayaasha hodanka ah.”

**Khibradaha:** “Kooxda Marinayada, oo ka shaqeyta Ciraaq iyo Afgaanistaan, waxaan bartay waxa hogaamin ay tahay - waxay marka hore muhiimada siinaysaa dadka aad hogaaminayso ama matalaysid. Waxaan u shaqeyay Senator Susan Collins oon ka mid ahaa xubin shaqaale oo xirfad leh ka hor inta aan la’iidooran sharci dejinta. Waxaan la shaqaynayaa dhinac kasta, sida xubnaha xisbiga Jamhuuriga iyo Gudoomiye LePage, si loo helo jawi caadi ah oo shaqada loo wada qabto.”

#### Hadafyada:

- In la dhiso dhaqaale cadaalad ah oo leh mushahar wanaagsan iyo daryeel caafimaad oo la awoodi karo dhamaan dadka reer Maine
- Dib u hagaajinta dhismayaasha sii xumaanaya ee Maine
- In la ilaaliyo Lambarka Bulshada marka la hawl gabo iyo daryeelka caafimaadka ee Medicare

# ★ Wakiilka Maraykanka – Degmada 2

## ★ Musharaxiinta – Degmada 2



Xulashada doorashada codaynta



### William Hoar

**Shaqada Hada:** Macalinka Waxbarashada Gaarka Ah

**Magaalada:** Southwest Harbor, Maine

**Website:** [VoteHoar.com](http://VoteHoar.com)

Xisbiga Madaxa  
Banana  
Musharaxa

*Musharaxu ma bixin macluumaad.*



### Bruce Poliquin

**Shaqada Hada:** Xubin Aqalka Congresska, Degmada 2aad ee Maine

**Magaalada:** Oakland, Maine

**Website:** [PoliquinForCongress.com](http://PoliquinForCongress.com)

**War bixinta Shakhsiga:** “Waxaa isoo korisay hooyo leh xirfad kalkaaliso caafimaad iyo aabe macalin dugsi oo ku yaala bartamaha Maine, waxaan ku soo koray qoys daryeelka caafimaad iyo waxbarashadu ay aad u muhiim u yihiin. Waxaan wiilkayga ku koriyey hooyo la’aan oo ku salaysan sidii la igu soo koriyey.”

Republican Party  
Candidate

**Khibradaha:** “In ka badan 30 sano oo waayo-aragnimo ah oo leh abuurista shaqooyinka iyo hawlaha ganacsiga yar, oo ay weheliso Qasnajigii hore ee Maine, waan garanayaa waxa loo baahan yahay si dhaqaalaheenu u maro jihada saxda ah.”

**Hadafyada:**

- Sii wadka ilaalinta iyo kobcinta shaqooyinka anoo la dagaalamaya ganacsiga sharci darrada ah iyo hoos u dhigida canshuuraha
- Ilaalinta Lambarka Bulshada hawl gabka iyo caafimaadka dawlada Medicare
- Sii wadida udagaalka milateriga Maine oo ah xubin ka tirsan Guddiga Arimaha Gudaha

# ★ Mashruuca Muwaadiniinta/Arimaha Damaanada

## ★ Waa maxay Mashruuca Muwaadiniinta?

- Qofkasta oo diiwaan gashan si uu u codeeyo kunool Maine ayaa bilaabi kara mashruuc muwaadiniin, kaas oo ah sharci lasoo jeediyey.
- Codbixiyuhu waa inuu soo diro arji. Waa inay kujiraan arjiga qoraal ka hadlaya sharciga lasoo dejiyey.
- Marka codsiga la aqballo, Xoghayaha Dawlada ayaa soo siyarin doona arji. Waa inay saxeexaan arjigaas codbixiyaasha gobalka Maine.
- 2018, arjigu waa inay helaan 16,123 saxeex ansax ah si loogu daro codbixinta (10% oo isku darka codadka guud ee doorashada gudoomiyaha gobolka ee codbixinta 2014)
- Kahor inta aan mashruuca lagelin codbixinta, sharci dejiyayaasha Maine ayaa heli doona fursad ay ku gudbiyaan sharcigan.
- Hadii ay sharci dejiyayaasha Maine ay hir gelin waayaan sharcigaas, waxaa fursad lasiin doonaa codbixiyaasha Maine sidii ay u dooran lahaayeen ama u diidi lahaayeen sharciga.

## ★ Waa maxay Damaanad?

- Gobolka Maine wuxuu deynsadaa lacag iyadoo la isticmaalayo gadista damaanashada
- Gobolku wuxuu bixiyaa dulsaar lacagta uu deynsaday
- Codbixiyaasha Maine ayaa aslixiya si uu gobolku u iibsado damaanashada
- Hadii ay codbixiyayaashu ay aslaxiyaan damaanashada, khasnajiga gobolka ayaa ansaxiya damaanashada si loo hir geliyo mashruucyada.
- Gobolku lacagta dib ayuu u bixin doonaa iyo dulsaar wakhtiga loogu talagalay ( badanaa 10 sano)

## ★ Waa maxay saamaynta dhaqaale hadii la hir geliyo damanashooyinkan?

- Hadii lawada hir geliyo su'aalaha damaanashada bisha November, isku darka dib u bixinta damaanashooyinku waa \$255 milyan tobon sano. Taas oo ah \$200 million daynta iyo \$55 milyan dulsaar.
- Hadii kuli damaanashooyinka la aqballo, dib u bixinta damanashooyinkan iyo kuwii ka horeeyey waxay isku noqon doonaan ilaa 2.8% miisaaniya guud ee gobolka,
- Lacagta lagu bixin doono damaanashooyinka waxay kasoo baxaa sanduuqa guud ee qaranka sanad kasta ama sanduuqa jidka weyn. Waa in la bixiyo lacagahan deynta ah.
- Mashruucyada lagu fuliyey daymahan waxay soo saari doonaan \$191 milyan oo dheeraad ah dhinaca dawlada f federaalka iyo dhinacyada gaarka ah oo aan dib loo bixinayn.

**Wixii faah faahin dheeraad ah oo la xiriira mashruucyada muwaadiniinta iyo su'aalaha damaanada:**  
**Booqo boga Hagaha Muwaadiniinta Doorashada Aftida: <https://maine.gov/sos/cec/elec/upcoming/>**

# ★ Su'aasha 1: Mashruuca Muwaadiniinta

## Su'aasha:

*"Ma doonaysaa inaad hesho daryeelka guriga oo caalam ah oo kusalaysan caawinaad guriga una gaar ah dadka naafada ah iyo dadka waayeelka ah iyadoo aan loo eegayn dakhligooda, ayna maal geliyeen 3.8% cashuurta laga qaado dadka iyo qoysaska Maine mushahaarkooda guud marka la eego cashuurla lambarka bulshada kaasoo ah \$128,400 sanadka 2018?"*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Wax qabadkani wuxuu bixinayaa mudo dheer caawino dadka waayeelka ah iyo dadka naafada ah iyagoo jooga gurigooda aana lacag laga qaadeyn iyaga iyo qoyskooda. Adeegyadan waxaa bixin doona kharashkooda cashuur ah 3.8% oo ah dakhliyada badan taasoo laga dhaafay dawlada federaalka cashuurta nambarka bulshada. Cashurtu waxay keliya oo laga qaadayaa dakhli galka ka badan \$128,400.



### Doodaha Haa

- Gobolka Maine waxaa ku badan dadka waayeelka ah, waana muhiim in la ilaaliyo waayeelka
- Waayeelka iyo dadka naafada ah waa inay awoodaan inay guryahooda joogaan iyo qoysaskooda haday suurto gal tahay
- Daryeelka guriga ee caalamka ahi wixuu xirfad u yahay daryeelka shaqada iyadoo hubinaysa in la siiyo mushahaaro wanaagsan iyo faa'iidooyin shaqaalaha.



### Doodaha Maya

- Hadii kor loogu qaado cashuuraha dadka dakhliga badani soo galo way ka guuri karaan gobolka taaso dhibaato u keenaysa dhaqaalaha gobolka.
- Lacagta laga helo daryeelka guriga wuxuu noqon doonaa mid ay xukumadaan dad aan ahayn kuwo ku salaysan dadweynaha gobolka
- Dadka taajiriinta ah ayaa heli doona daryeelka guriga xataa hadii ay iska bixin karaan si fudud.

# ★ Su'aasha 2: Damaanada Biyaha Wasakhda

## Su'aasha:

*"Ma danaynaysaa in \$30,000,000 damaanasho ah in la bixiyo si loo hagaajiyo tayada biyaha, taageer qorshaha iyo dhismaha nadaafinta xarumaha biyaha iyo caawinta dadka guryaha leh oo guryahoodu lagu nidaamiyo hababka daaweynta biyaha?"*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Gobolka Maine wuxuu amaahan doonaa \$30 milyan si loo hagaajiyo tayada biyaha iyadoo loo marayo daawenta ama nadaafinta biyaha. Lacagta waxaa loo kala qaybin doonaa, \$27.6 milyan si loo nadiifiyo biyaha xarumaha degaanka, \$2.0 milyan lagu bedelo haamaha jabay taasoo wasakhaysa xeebaha iyo \$350,000 lagu caawiyo dadka guryaha leh inay ku hagaajistaan haamaha iyo tuubooyinka iyo waxyaabaha kale ee lagu isticmaalo nidaamka qashin saarka.



### Doodaha Haa

- Maalgelinta nadiifinta biyaha waxay keeni doontaa biyo tayo wanaagsan
- Hadii ay maal gelistu ay dib u dhacdo, waxaa kor u kici doona qiimaha lagu hagaajin doono
- Dadka guryaha leh ma awoodaan inay wax ka qabtaan dhibaatooyinka hagaajinta tayada biyaha keligood.
- Dulsaarka lacagtu hada wey hoosaysaa, taasoo macnaheedu waa deymuhu hada waxay ku kacaysa in ka yar hadii loo eego inta ku kici karta mustaqbalka.



### Doodaha Maya

- Waxaa ku darmi doonaa \$30 milyan deynta lagu leeyahay gobolka Maine
- Waxay ku kici doontaa \$38 milyan mabda'ahaan iyo dulsaar 10 sano si dib loogu bixiyo deyntan
- Deymahan waa in la bixiyo. Tani waxay kor u qaadaysaa canshuuraha wayna adkaanaysaa sidii cashuuraha hoos loogu dhigi lahaa.
- Dadka qaar waxay aaminsanyihiin in nidaamka qashin-saarka biyaha aanu u baahnayn maalgelin.

# ★ Su'aasha 3: Damaanadaha Gaadiidka

## Su'aasha:

*"Ma rabtaa in \$106,000,000 dayn ah, oo ay ku jirto \$101,000,000 dismaha, dib u dhisida iyo dib u habaynta jidadka waaweyn iyo buundooyinka iyo qalabka dekedaha, iyo meelaha doonyuhu kusoo xirtaan, gaadiidka bada, gawaarida xamuulka iyo tareenada, gaadiidka duulimaadka iyo baaskiilada iyo jidka dadku ku lugeeyaan, in loo isticmaalo qiyaastii \$137,000,000 lacagaha dawlada federaalka iyo lacago kale, iyo \$5,000,000 oo ah dub u hagaajinta biyo mareenka dhulka hoose?"*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Gobolka Maine wuxuu amaahan doonaa \$106 milyan si loo hagaajiyo jidadka waaweyn, buundooyinka, xeebaha, garoomaha diyaaradaha, baaskeelada iyo jidka dadku ku lugeeyaan, Hadii deynta la aqbal, \$142 milyan oo kale ayaa laga heli doonaa dawlada federaalka iyo meelo kale.



### Doodaha Haa

- Waa macquul in la maal geliyo dhismaha nidaamka gaadiidka si loo helo jidad iyo buundooyin amaan ah
- Amaahdani waxay keeni doontaa shaqoyin cusub oo dhismaha la xiriira
- Nidaamka gaadiidka wanaagsan wuxuu muhiim u yahay dhaqaalaha Maine.
- Lacagta la midka ah ma aha in la bixiyo, sidaas darteed waa qiimo wanaagsan u tahay gobolka Maine
- Dulsaarka lacagtu hada wey hoosaysaa, taasoo macnaheedu waa deymuhu hada waxay ku kacaysa in ka yar hadii loo eego inta ku kici karta mustaqbalka.



### Doodaha Maya

- Waxaa ku darri doonaa \$106 milyan deynta lagu leeyahay gobolka Maine
- Waxay ku kici doontaa \$135 milyan mabda'aahan iyo dulsaar 10 sano si dib loogu bixiyo deyntan
- Deymahan waa in la bixiyo. Tani waxay kor u qaadaysaa canshuuraha wayna adkaanaysaa sidii cashuuraha hoos loogu dhigi lahaa.
- Dadka qaar waxay aaminsanyihiin inaan loo baahnayn in la maalgeliyo nidaamka gaadiidka.

# ★ Su'aasha 4: Deynta Jaamacadaha

## Su'aasha:

*"Ma rabtaa in la helo deyn dhan \$49,000,000 oo laga heli doono \$49,000,000 dhaqaalaha dadweynaha iyo kuwa gaarka ah si loo casriyeeyo dhismayaasha jaamacadaha ee Maine si loo balaariyo awooda horumarinta shaqaalaha iyo inay soo jiidato ardayda si ay u xoojiyaan dhaqaalaha Maine iyo shaqaaleynta mustaqbalka?"*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Gobolka Maine wuxuu amaahan doonaa \$49 milyan si loo hagaajiyo dhismayaasha jaamacadaha Maine si loo balaariyo awooda horumarinta shaqaalaha iyo inay soo jiidato ardayda. Si loo helo lacagtan waa in laga soo uruuriyo miisaaniyada dadweynaha \$49 milyan oo kale.



### Doodaha Haa

- Maalgelinta jaamacadahu waxayna u fiican tahay ardayda iyo dhaqaalaha guud.
- Casriyaynta xarumaha jaamacada ayaa ka dhigaysa mid soo jiidasho leh iyo kala doorasho.
- Jaamacadaha xoogani waxay hore u mariyaan tayada nolosha waxayna caawisaa lacagta iyo ardaydaydu inay ka tegin gobolka
- Dulsaarka lacagtu hada wey hoosaysaa, taas macnaheedu waa deyntu hada waxay ku kacaysa in ka yar hadii loo eego inta ku kici karta mustaqbalka.
- Lacagta la heli doono ma aha in la bixiyo, sidaas darteed deyntu waxay u leedaay qiimo wanaagsan gobolka Maine.



### Doodaha Maya

- Waxaa ku darsami doonta \$49 milyan deynta lagu leeyahay gobolka Maine
- Waxay ku kici doontaa \$62 milyan mabda'ahaan iyo dulsaar 10 sano si dib loogu bixiyo deyntan
- Deymahan waa in la bixiyo. Taasi waxay kor u qaadaysaa canshuuraha wayna adkaanaysaa sidii cashuuraha hoos loogu dhigi lahaa.
- Dadka qaar waxay aaminsanyihiin inaan loo baahnayn in la maalgeliyo nidaamka dib u habaynta Jaamacadaha.

# ★ Su'aasha 5: Deymaha Kuliyaadaha Bulshada

## Su'aasha:

*"Marabtaa in \$ 15,000,000 oo deny ah in la aqballo si loo hagaajiso barnaamijyada iyo xarumaha waxbarashada oo ay ka mid yihiin 7da kulliyadood ee Maine si ay u helaan dadka Maine xirfado sare, farsamo kharash yar iyo mustaqbal waxbarasho iyo shaqaalayn leh?"*

## ★ Waa maxay su'aashan macnaheedu?

Gobolka Maine wuxuu deynsan doonaa 15 milyan si loo cusbooneysiyo loona balaadhiyo shaybaarada tacliinta, macluumaadka warbixinta, iyo kululeynta iyo nadaafada nidaamka todobada kuuliyadood ee bulshada Maine.



### Doodaha Haa

- Ardaydu waxay u baahan yihiin fursado ay ku helaan tacliin sare Maine. Kuuliyahada bulshadu waxay siiyaan fursado fiican arday badan.
- Maalingelin lagu sameeyo xarumaha kuliyaduhu waxay waxay ka badbaadin doontaa maalgelinta mudo dheer.
- Kuliyadaha bulshadu waxay u horseedan inay kasoo baxaan arday waxbarasho fiican haysta iyo xirfado ay ku helaan shaqooyin ay ka helaan lacag fiican.
- Dulsaarka lacagtu hada wey hoosaysaa, taas macnaheedu waa deyntu hada waxay ku kacaysa in ka yar hadii loo eego inta ku kici karta mustaqbalka.



### Doodaha Maya

- Waxaa ku darsami doonta \$15 milyan deynta lagu leeyahay gobolka Maine
- Waxay ku kici doontaa \$19 milyan mabda'ahaan iyo dulsaar 10 sano si dib loogu bixiyo deyntan
- Deymahan waa in la bixiyo. Taasi waxay kor u qaadaysaa canshuuraha wayna adkaanaysaa sidii cashuuraha hoos loogu dhigi lahaa.
- Dadka qaar waxay aaminsanyihiin inaan loo baahnayn in la maalgeliyo nidaamka dib u habaynta kuuliyadaha bulshada.



**Doorka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine ee sanduuqa dhaqaalaha waxbarashadu waxay ka shaqeeyaan bararujinta iyo waxbarashada bulshada si ay u codbixiyaan.** Waa urur aan dawli ahayn una hawlgala inay dadweynaha baraan wixii ku saabsan codaynta:

- Waxaan dhisnaa ka qaybqaadashada dadweynaha iyo hab ku socda dimuquraadiyad.
- Waxaan qiimaynaa arimaha khuseeya bulshada ee muhiimka ah guud ahaan heerarka dowladeed anaga oon dhinac raacsanayn.
- Waxaan awood u siinaa dadweynaha in ay raadiyaan xalal wax ku ool ah oo ku saabsan arimaha siyaasada bulshada iyada oo loo marayo xaga waxbarashada iyo maareynta isku dhaca.

*Deeqaha Sanduuqa Waxbarashada LWVME, oo ah 501 (c) (3) urur, ayaa canshuur laga jari karo marka sharcigu uu ogolaado.*

**Doorka horyaalka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine:** Waa urur ka shaqeeya barashada siyaasada iyagoon dhinacyada siyaasiyiinta aan raacsanayn. Waxay dhiiri geliyaan ka qaybqaadashada arimaha dadlada, waxay ka shaqeeyaan sidii ay kor ugu qaadi lahaayeen fahamka siyaasada iyo arimaha saameeya siyaasada guud iyagoo isticmaalaya xaga waxbarashada iyo baraarujinta. Marna ma taageerno ama kama soo hor jeesano xibi ama musharax.

*Deeqaha Doorka Horyaalka Haweenka Codbixiyayaasha Maine canshuur laga jarayo.*

**Kusoo biir Doorka horyaalka haweenka codbixiyayaasha gobolka Maine internetka: [lwvme.org/join.html](http://lwvme.org/join.html)**

*Horyaalku ma aha mid dumarka oo keliya! Qof kasta oo taageera hawlgalka Horyaalkan ayaa lagu soo dhaweynayaa inuu ka noqdo xubin.*



**[facebook.com/LWVME](https://www.facebook.com/LWVME)**



**[@LWVME](https://twitter.com/LWVME)**



**[@LWVME](https://www.instagram.com/LWVME)**